"Daryeel bixiyahayga Taageerada Guriga waxay ahayd mid aad caawimaad u leh. Waxay igu caawisay in aan meelaha barto oona dib ugu soo noqdo bulshada. Waxay ii timaadaa halmar todobaadkii waxaana ka wada hadalnaa arin kasta oo aan u baahdo in la igu caawiyo.

Caawimaadeeda, waxaan ku noqday haweenay isku filan oona awooda in aan dib ugu noqdo shaqada waxaana si tar-tiib ah u noqday qof guuleysta markale. Adeega wuxuu igu caawiyay in aan noqdo qof nidaamsan oona dejista ahdaaf."

~ Mary
Kaqayb qaate Taageerada Guriga

Sideen ku heli karaa macluumaad baddan oo ku saabsan Taageerada Guriga?

Fadlan ii-mayl kusoo dir cinwaankan:
SupportiveHousing@dshs.wa.gov

ama wac lambarka teleefoonka lacag la'aanta ah: 1-844-704-6786

Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives
DSHS 22-1762 SM (3/18) Somali

Taageerada Guriga

Taageerooyinka kugu caawinaya in aad si wanaagsan oo guul leh ugu noolaatid gurigaaga.

Maamulka Taageerada
Muddada-Dheer iyo Waayeelka

Taageerada Guriga

- Waxay kugu caawinaysaa in aad heshid guri aad awoodid meeshaas oo aad doonaysid in aad ku noolaatid.
- Waxay kugu caawinaysaa in aad u guurtid gurigaaga khaaska ah.
- Waxay kugu caawinaysaa in aad sii ahaatid gurigaaga ayaga oo:
  - Kugu caawinaya ahdaaftaada.
  - Kugu caawinaya in aad samaysatid xirfado aad ku guuleysatid.
  - Kugu xiraya xogag bulshada ah oo xiriir la leh ahdaaftaada.
- Ku siinaya in aad u gashid shaqaalaha taageerada khaaska ah.
- Waa adeeg doorasho ama ikhtiyaari ah: adiga ayaa dooranaya in aad kaqayb qaadatid.

Maxaa laga wadaa Taageerada Guriga?

Doorashada Guriga: Waxaad dooranaysaa adiga deriskaaga iyo guriga aad jeceshahay in aad ku noolaatid ayada oo ay kusalaysantahay helitaanka.

Aqoonso Caqabadaha: Taageerada waxaa loo helayaa si laguugu caawiyo in aad samaysatid xirfado kugu caawinaya in aad sii joogtid oona ilaalisid gurigaaga. Kaqayb qaadashadu ma ahan mid xiriir la leh daaweyn caafimaad, miyir la'aan, ama ka istaagid.

Doorashada Adeega: Waxaan kugula shaqayn doonaa in aad habbeysid adeego iyo taageerooyin lagu sheegayo baahooyinkaaga iyo waxyaabaha aad jeceshahay.

Dhexgelida Bulshada: Waxaan kugu caawin doonaa in aad oggaatid inbaddan oona kaqayb qaadatid bulshada, haddii ay tahay hawlo, shaqaalayn, cibaado –adiga uun sheeg!

Taageerada Shaqaalaha: Waxaad u gali doontaa shaqaalaha kuwaas oo kugu caawinaya in aad xalisid mushkilada kuna siinaya taageerooyin aad ku guuleysatid.

Dib-u dhacyada ama caqabadaha: Adeega wuxuu aqoonsanyahay in ay dhacayaan dib-u dhacyo ama caqabado waxaana kugu caawin doonaa sidii loo xalin lahaa haddii iyo goorta ay dhacaan.

Anigu miyaan u Qalmaa Adeegaha Taageerada Guriga ee ALTSA?

Taageerada Guriga waxay noqon kartaa mid adiga caawimaad kuu leh haddii aad tahay qof u qalma adeegaha ka ahaada dhinaca Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelka (ALTSA) iyo haddii mid ka mid ah kuwaan soo socda uu adiga ku khuseeyo:

- Adigu ku nooshahay goob hay'adeed, aad sugaysid sariir isbitaal dhimirka ah, ama tahay qof guri la'aan ah.
- Adigu doonaysid in aad ku noolaatid gurigaaga khaaska ah, laakiin u baahantahay xoogaa taageero ah.
- Goobo deegaan (sida guryo qoys qofka weyn ah) aanan marnaba adiga kuu shaqaynin.
- Dhib ku qabtid in aad haysatid daryeel bixiye joogto ah.

U qalmitaanka ALTSA waxaa lagu xadidaa dhinaca:

- Shuruuda dhaqaale (dakhligaaga iyo ilahaaga dhaqaale), iyo
- Shuruuda shaqo (tirada caawimaada aad ugu baahantahay hawlahaaga maalin laha ah).